

Carruurta ka yar 12 sanno waa in iyagana tijaabo lagaga qaado xuduudda

Dawladdu waxa ay go'aamisay in xataa carruurta ka yar 12 sanno tijaabo lagaga qaado xuduudda. Wax-ka-beddelkan waxa u sabab ah in noocyada cusub ee fayrusku ay yihiin kuwo si fudud la isu qaadsiiyo, xataa marka qofka cudurka qaaday uu yahay ilmo yar.

- Waa muhiim in tijaabo-qaadistu aanay noqon mid dhibaysa carruurta, markaa xarumaha tijaabo-qaadista waxa la siin doonnaa tilmaamo ku saabsan in habka tijaabo-qaadista ee la isticmaalayo noqdo midka ugu dhibta yar ee la heli karo, ayuu yidhi Bent Høie oo ah wasiirka caafimaadka iyo daryeelka.

Talooyinka ka yimi Agaasinka Caafimaadka Iyo Machadka Caafimaadka Dadweynaha (FHI) waxa ay hoosta ka xarriiqeen in tijaabooyinka carruurta laga qaado hadda loo samayn karo qaab dhib yar marka tijaabada laga qaadayo qaybta hore ee sanko. Carruurta marar badan ka gudba xuduudda, tusaale ahaan arrimo qoys dartood, waa laga dhaafay karantiilka. Hay'adduhu waxa ay garteen in qodobadaasi ay sheegayaan in loo baahan yahay in tijaabo laga qaado dhammaan carruurta. Haddii ay suurtaggal noqon weydo in la qaado tijaabo, tusaale ahaan haddii ilmuhu diido, waa in aan laga qaadin tijaabo.

Wax-ka-beddelkani waxa uu dhaqangalayaa laga bilaabo isniin 19. Abriil saacadda 00.00.